# SIDEE SALAADA LOOGU KHASHUUCAA

# TUSMADA buuga

**Hordhac……………………………………..…..3**
**Sababta keentay qorista buuggan …..…….4**
**Mahadnaq……………………………………5**
**Xaquuqda buugga…………………….……6**
**Afeef…………………………………………7**
**Waa maxay khashuuc?……………….…..8**
**Xukunka khashuuca salaada……………….9**
**Waxyaabaha khashuuca kugaarsiikara…. 10**
**Waxyaabaha kaa fogeyn kara khashuuca 25**
**Istustus(shirkul asqar)...........……………25**
**Xukunka istustuska…………………………25**
**Was-waaska…………………………….…29**
**Asbaabaha looga xoroobo was-waaska.. 32**
**Farqiga udhaxeeyo shirki akbar iyo shirki asqar………………………………………40**
**Shirki asqar…………………………………41**
**Tusaale yaal shirki asqar ah……………….42**
**Shirki akbar…………………………………56**
**Tusaale yaal shirki akbar …………………..57**
**Sidee salaada loogu khashuucaa…………62**
**Qeybaha khashuuca…………………………64**
**Muhiimada khashuuca salaada ……………72**

# HORDHAC

بسم الله الرحمن الرحيم

**Mahad oo dhami waxey usugnaaday oona mudan allaaha sareeyo, Naxariis iyo nabadgelyana rabbi korgiisa hayeelo rasuulkiisa muxamed sallalaahu caylhi walasam.**
**Horta aan isbarano magaceygu waa Maxamed muxumed makaraan, waxaan ahay arday dhigta iskuulka jaabir binu xayaan qeybtiisa nasteexo, waxaan ahay fasalka 3aad ee dugsiga sare ama form three.**
**Buugani waa kii ugu horeeyay ee aan qoro. Asagoo ibo fur unoqodoono buugaag badan insha allaah.**
**Waxaa buuggaan uga hadlayaa rukni ay xadkiisa culimada qaar ay gaarsiiyeen waajib halka culimo kalane qabaan inuu sunno yahay kaas oo ah KHASHUUCA SALAADA.**
**Waxaa alle fadligiisa ina aan buuggan bilaabay qoritaankiisa 18/3/ 2023 aana dhameeyo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/3/2023 maalin arbaco ah. Alle ayaan uga mahad celinayaa oo ugu garabgalay in aan soo saaro buuggan.**

## Sababta keentay qorsita buuggan

**Buuggan waxaa igu qasbay in aan qoro dhalinyaro  badan oo oo isugu jiro ragg iyo dumarba oo aan aqoonin khashuuca salaada iyo waxa uu yahayba, iyo kuwo qaarkood oo siqaldan ufahansan khashuuca salaada.**

**Sida aynu wada ognahay soomaaliya 100% waa dad muslimiin sunni ah.  Ayadoo ay raxmadaas alle nasiiyay ayjirto hadane qaladaad badan ayaa dadka qaar kujira cibaadada ay sameynayaan. Kuwaas oo ah qaarkood kuwo dembi ah, halka kuwo kale qaarkood bidco yihiin( wax aan diinta kamid aheyn laakiin dadka ayay laqurxanaataa oo kolkaa ka diin dhigta)**
**. Hadane markasta alle fadligiisa ayaynu rajeyneynaa.**
**Waxaa kale oo igu qasbay qorida buuggan in uu jirin buug somali kuqoran oo kahadlaya cinwaankan oo kale haduu jirane aan anigu wali arkin.**

# Mahadnaq

**Markahore mahad oo dhami waxay usugnaaday oo mudan allaah subxaanahu watacaalaa.**
**Intaas kadib waxaan umhad celinayaa macallimiintii wax isoo baray oo dhan, qaasadan macalimiinteyda diiniga isoo baray iyo kuwa hadda ibaro.**

**Waxaa kale oo aan umahad celinayaa labadii waalid ee isoo barbaariyay, oo hadii uu jiri laheyn fadliga alle kadibna dedaalkoodii ay maanta iisuuro gelilaheyn in aan wax qoro.**

**Waxaa kale oo aan umahad celinayaa intii igu dheerigelisay qoridda buuggan oo uu ugu horeeyo AADAN CABDI XASAN (WALAAL BAASIT).**

**Iyo inta aqri doonto buuggan.**
**Mahadsanidiin dhamaan.**

## Xaquuqda buugga

**Waxkasta xaquuq ayay kuguleeyihiin adigane xaquuq ayaad kuleedahay.**

**Sidaa dardeed waxaa rajeynaa in aad buuggan xaqiisa aad siido,taas oo ah qodobadaan soo socdo.**

**1:buuggan waxaa qoray aniga oo maxamed muxumed makaraan. Waxaad fasax utahay inaad koobiyadeesato(copy aad kusameyso) adigoo wax ogolaansho ah isoo weydiin.**

**2: buuggan waxaa kuqoran aayado quraanka kariimka kamid ah, iyo axaadiithta nabigeena sallalaahu calayhi wasalm, marka waxaan kaa codsanayaa inaad fiiriso halka aad dhigeyso, adigoo ixtiraamaya aayaadka alle.**

**3: buuggan  markii uu kusoo gaaro laguuma ogola inaad waxkajarto ama aad waxkudarto, geliya adigoo wax udhimeynin xaquuqdiisa waad goobiyadeysankartaa.**

## Afeef

**Buuggani waa kii ugu horey ee aan qoro nolosheyda sidii aan hordhacaba kusoo sheegay, sidardeed waxaa dhicikaro qaladaad, marka**
**Hadii wax qalad ah aragto waxaan kaa codsanayaa in aad si naseexo ah aad iigu soo gudbiso, adigoo igala soo xariiraya numberkaan:0618267690.**

**Waxii qalad ah ee igadhaco naf iyo sheydhaan baa usabab ah, waxii aan saxayna fadliga alle ayaan ku haleelay, alle ayaana weydiisanayaa waxii  qalad ah ee iga dhacay inuu iga cafiyo.**
**Waxaa kale oo ka afeefanayaa in xarfaha qaar iskuqalday sida anigoo raba "oo" in aan daabto"ii" ama anigoo raba "N" inaa daabtay"m" waxii aan kasaxi karay waan kasaxay,balse dhamaan in aan wada saxin ayaa lagayaabaa,sababtuna waa in buugga telefan kuqoray oo aan computer kuqorin, iyo in ay aad iskugu dhowyihiin xarfaha telefanka.**

## Waa maxay khashuuc?

**Khashuuca waa soo xaadirinta qalbiga ayadoo loo soo xaadirinayo hor isdaagga alle subxaanahu watacaalaa ayadoo ay lajirto khudhuuc iyo isduleyn. Sidaan waxaa ku qeexay ibnu qayim alle ha unaxariistee.**

**قال ابن القيم :الخشوع: قيام القلب بين يدي الرب بالْخُضُوع والذُّلِّ.**

**Khashuuca salaadu waxuu ugu jiraa meel muhiim ah sida allaah subxaanu watacaalaa quraankiisa kusheegay qaasadan suuratul mu'minuun aayadeeda labaad alle wuxuu yiri (xaqiiqdii waxaa liibaanay mu'miniinta. Mu'miniintaasoo ku khashuuca salaadooda) Khashuuca waa isduleyn leysku duleeyo alle iyo jilcanaan lajilciyo qalbiga,**

**salaadu hadii ay khashuuc la'aantahay waxaa dhacda in ruuxa dukanaya qalbigiisa uu iskabaxo oo meelo kale kafikiro. Kuwaasne alle waxuu kutilmaamay kuwo hoogay sida uu alle kudhahay quraanka qaasadan suuratul maacuun aayadeeda 4-5 rabi gor ahaayey waxuu yiri(waxuu hoog usugnaaday kuwa dukada kuwaas oo hilmaamsan salaadooda).**

## xukunka khashuuca salaada?

**Xukunka khashuuca salaada lagu dhex khashuucaa culimada inta badan wey isku qilaafsanyihiin. Laakiin waxaa loo badanyahay in uu sunno yahay sidaasna waxaa qaba culimo badan qaasadan waxaa qaba mad-habka ay soomaalida ubadantahay ee shaaficiga marka laga reebo qaar yar oo culimada shaaficiyada kamida oo qabo mooyee inuu waajib yahay. Inuu sunno yahayna waxaa qaba badanaa culimada muslimiinta sida imaamu nawawi قال النَّوويُّ: فأجمَع العلماء على استحباب الخشوع والخضوع في الصَّلاة.**

**Marka xukun ahaan waa sunno waxaana xusid mudan in hadii aynu ogaanay inuu sunno yahay ay dadka qaar ay fududeystaan oo ay yiraahdaan waa sunno uun ee waajib iguma ah laakiin waa inaad qalbiga kuheysaa haduu uu sunno yahay in aan lasahlan kareynin. Oo waxaa dhicikarta in khashuuc la'aanta ay ajarkaaga wax weyn udhimo. Ama salaadii kaa ansaxmato laakiin ajarkii iyo fadligii aad weyso.**

## Isxasuusin.

**1:** waa maxay khashuuc?  2: meel sidee ah buu kadaaganyahay khashuuca salaada? 3:masunaa mise waa waajib khashuuca? 4:quraanka malagu sheegay khashuuca?  5: salaada muxuu udhimikaraa khashuuca oo lagadago.

**Iftiimin.** 1: khashuuca waa inaad hor isdaagdaa rabigaa qalibigaaga oo kujiro khadhuuc iyo isduleyn.    2:meel muhiim ah buu uga jiraa salaada 3:khashuuca waa sunno 4:  haa waa lagu aheegay quraanka. 5: khashuuca oo laga dago salaada wuxuu udhimikara inaad weyso ajarkii laakiin ay kaa ansaxmato oo qilo lagaa rabin.
N.B hadaad aragto is xasuusin waxaa kahooseeyo su'aalo kadibna jawaabo kusii xigo. kajwaab su'aalaha adigoo jawaabaha fiirin, markii aad kajawaabtana fiiiri inta aad saxday iyo inta aad qaladay.

## Waxyaabaha khashuuca kugaarsiikara

**Maadaama aad ila soo fahantahay qeexida iyo axkaamta khashuuca waa kuqasbanahay**

**inaan ogaano waxyaabaha kugaarsiinkara khashuuca oo salaada lagu dhex khashuuco. Horta khashuuca salaada waa umihiim sida aan soo sheegnay asbaabaha kugaarsiikarana waxaa kamida**

**1:inaad fahansantahay waxa aad kudukaneysid,  maxaa kawada hadalkaan? Anaa kufahansiinayo ee bal aayadaan halmar aqri**
**أَوَلَمْ يَرَوْا إِلَى الطَّيْرِ فَوْقَهُمْ صَافَّاتٍ وَيَقْبِضْنَ ۚ مَا يُمْسِكُهُنَّ إِلَّا الرَّحْمَٰنُ ۚ إِنَّهُ بِكُلِّ شَيْءٍ بَصِيرٌ**
**Maxaad kafahantay?**

**ilaa iyo hada hadaadan fahmin bal aynu isla fiirino macnaha aayadan. Alle gor ahaayey waxuu leeyahay(miyaaney argeynin oo kucibro qaadaneynin shimbiraha gorkooda ah oo marna safaya baalashooda marna iskulaabaya oo hadane soo dhaceynin hadii soo dhacaane cid qabaneyso ayna jirin alle raxmaan mooyee).**
**Hadii aad tafsiirkeeda garaneysid qasab waxaa ah iney kugu soo dhaceyso awooda**

**weyn ee alle xasuusashadaas aad xasuustay awooda alle ayaa ah khashuuca.**

**Laakiin hadii aadan aqoonin tafsiirkeeda waxaa dhacda in aad sidii aheyd markii aad salaada galeysay aad sii ahaado. Tusaale hadii aad aheyd qof xanaaqsan waxbo iskagaa bedeli maayaan.**
**Marka waa kas muhiimada tafsiirka.**

**Quraanka waxa uu iskugu jiraa qaar farid iyo reebid ah. Qaar qisooyin ah. Qaar duco ah.**

**Tusaale suurada aan leyska dhaafi kareynin xiliga salaada oo waajibka tahay in la aqriyaa waa suuratul faatixa inteeda badana waa duco.**
**Iney waajibtahay aqrinteeda oo laga dagikareynin waxaa kutusaya xadiithka nabiga oo ah.**

**عن عُبَادَةَ بْنِ الصَّامِت رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال: «لا صلاة لمن لم يَقْرَأْ بفاتحة الكتاب». [صحيح] - [متفق عليه].**

**Macnaha xadiithka waa ( salaadi uma jirto cidii aan aqrin faataxada kitaabka) halkaan waxaa laga fahmi iney salaadi ansaxmeynin faataxo la'aanteed. Hadii aad taas ila fahantay ila fahan inta mar ee saaka aqrisay iyo khashuucaagii,inta jeer ee maalintii faataxada la aqriyaa waa 17 mar, oo kala ah 4 rakco duhur ah rakco kastaahi kujirto 4 faatixo + 4casir ah +4 cishe ah +3 maqrib ah +2 subxi ah = 17.**
**Hada waxaad ila fahantay inaad maanta aqrisay faataxada 17 mar. Bal suurataan oo aan aqrino maalintii 17mar imisa mar ayaad aqrisay adigoo ku khashuucayo ama dhegta uraaricinayo macnaheeda ma gaareysaa 7jeer. Intaa 10ka meel iskadhigto. Maadaama ay duco tahay. Waxii lagu duceysanayay maheysataa. Tusaale faataxada waxaa kamida ducooyinkeeda(rabiyow nagu hannuuni jidka kuwii aad unicemysa, nagana badbaadi jidka kuwii loo carooday iyo jidka kuwii lumay).**

**Hadii aad aqrisay faataxada adigoo foot kuu jarantahay(wiil) ama adigoo**

**iscadeeyay(gabar) oo kudaysaday naag gaal ah oo cad ama kudaysaday gaal foot leh miyay kulatahay in lagaa aqbalay faataxada ducadii kujirtay oo aheyd rabiyow iga badbaadi jidka kuwii lumay iyo kuwa loo carooday. ama guud ahaan salaadii, sababtoo ah hadii lagaa aqbalo salaadaadii foot majarateen ama hadii aad gabartahay ismacadeyseen oo salaada ayaa kuu diidi laheyd inaad dhaqankaas ku dhaqaaqdo sababtoo ah faataxada waxaa kamida اهدنا الصراط المستقيم صراط الذين أنعمت عليهم غير المغضوب عليهم ولا الضالين oo macnaheedu yahay**

**rabiyow nagu hanuuni jidka kuwii unimceysay ee aan aheyn jidka kuwii ucarootay iyo kuwii lumay**

**Marka yey yihiin kuwa loo carooday? waa yahuuda. Hadane waa kuma qoomka lumay? waa kiristaanka. Marka macquul matahay in adigoo dhahayo rabiyow iga badbaadi yahuud iyo kiristaan jidkoodii inaad kutayado? Sidee kudhacday inaad maalinkasta 17 mar kuduceysato inaad**

**kabadbaado jidka yahuuda iyo kiristanka hadane aad kudayado? Jawaabtu waa iney ubadantahay in salaadahaaga uu ikhlaas kujirin ! Sababtoo ah hadii si ikhlaas leh alle ugu baryi laheyd ducada faataxada ma dhici laheyn inaad kudayado jidkii aad kaduceysaneysay,oo ah kii yahuuda iyo kiristaanka Sababtoo ah salaada dadka waxey kareebtaa xumaanta,adigoo dukanaya oo hadane xumaan kujiro hadaad is aragto waa inaad acmaashaada aad fiirisaa.**
**Sababtoo ah**
**Alle quraanka wuxuu kusheegay in salaada ay munkarka iyo fuxshiga kaareebeyso,**
**ka aqri suuratul cankabuut aayada 45 alle wuxuu leeyahay**
**(اتل ما أوحي إليك من الكتاب وأقم الصلاة إن الصلاة تنـهى عن)**
**الفحشاء والمنكر ولذكر الله أكبر والله يعلم ما تصنعون**

**Macanaha aayadu waa: akhri(nabiyow) waxa laguu waxyoonayo oo kitaabka ah salaadana ooog,salaada waxey kareebeysaa(dadka) xumaanta iyo munkarka xusidda alle ayaana weyn allena waa ogyahay waxaad sameyneysaan.**

**Sidoo kale rasuulka waxuu yiri salaadi umajirto cidii ay salaadiisa xumaanta iyo munkarka kareebin.**

**Marka hada waxaad ilafahantay in salaada ay dadka udiido xumaanta. Marka maxey salaadaadu kaaga reebiweysay xumaanta maadaama aad maalinkii 17 mar aad ducadii muhiimka aheyd aad aqrisid? Aniga kuma dhiirankaro inaa kudhaho salaadahaagi lama aqbalo, sidoo kale kuma dhiirankaro inaan kudhaho ducadii muhiimka aheyd ee soo sheegnay lagaama aqbalo, sababtoo ah waxuu alle aqbalayo asaga uun baa og. Bal waxaaba dhicikarto in lagaa aqbalo laakiin ay ducadii soo daahdo. Sababtoo ah ducada weysoo daahdaa. Sidoo kale aqblida acmaasha waa laba nooc oo kala ah :mid intaa lagaa aqbalo hadane fadligii iyo ajarkii lagu siineynin waxaa tusaale u ah qofkii saaxir udago oo rumeeyo waxa uu kudhahay saaxirkaas rasuulka waxuu dhahay 40 maalin salaad lagama aqbalayo, sidaa ay tahay imaamu nawawi waxuu dhahay**

**culimada waxey ijmaac kuyihiin in qofkaas aan hadhow markii 40 maalin uu joogo ladhihidoonin salaadahaagii soo celi lagaama aqbaline,ee laga wado hadalka rasuulka salaada wey ka ansaxmi laakiin ajar iyo fadli kama helayo, taasi waa mid. 2: mid lagaa aqbalayo ajarna kaheleysid**
**Tusaale kale xanta iyo caayda waa leskareebay,qaasadan xiliga soonka. Marka qofkii asagoo sooman xan iyo caay sameeyo waxaa ladhahayaa soonkii wuu kaafasaaday, laakiin soo qaleey lama dhahayo hadhow, ee waxaa laga wadaa horta waajibkii alle wuu kaadhacay oo soomida aheyd laakiin ajar kama heleysid. Laakiin haduu biyo cabo waajibkii xitaa kadhici maayo. Marka aqbalida acmaasha waa labadaas in waajibkii kaa dhaco laakiin ajar kehelin. Iyo in uu waajibkii kaa dhaco ajarna aad hesho. Marka hadii adigoo tukanaya hadane dembiyo waaweyn dhexdabaalanayo hadaa is aragto waa inaad salaadahaaga fiiriso, soonkaaga fiiriso, sekadaada fiiriso. Dabcan danuubta yaryar weykaadhici karaan oo rasuulka waxuu qaadimkiisii(adeegahiisii)**

**anas ahaa kawerinayaa inuu dhahay:كلُّ بني آدم خَطَّاءٌ، وخيرُ الخَطَّائِينَ التوابون**
**Oo macnihiisa yahay ruuxkasta oo aadame ah wuu qaldamaa kuwa qaldamase waxaa ugu kheyr badan kuwa kasoo laabta qaladkooda. Marka dembi yar wuu kaadhicikaraa oo anigaan makaraan ah oo buugan qorayo dembiyo wey igadhacaan Markastana alle weyne ayaa weydiinayaa in adigaan aqrinayo iyo anigaan qoray qormadaan iyo waalidiinteen iyo walaaleheen udembi dhaafo. laakiin dembiyo waa weyn in aad kudhacdaa waxaa loo baahanyahay in acmaashaada wanaagsan ay kaasoo jiido,sida ay xumaantaba xumaan kale kuugu sii jiido ayuu wanaagana wanaag kale kuugu sii jiidaa. Dembiyada waa weyn malaha tiro xadidan laakiin waxaa kamida qaar ay axaadiiththa sheegtay, sida 7 dembi ee leskudhaho (sabcatul muubiqaat) sidoo kale axaadiiththa dembiyada waa weyn kahadlaa sifaat kooda waxaa kamida iney kusoo arooraan فليس منا oo ah qofkii waxaas sameeyo nagama mid aha inuu rasuulka uu dhaho oo kale dembi weyn ayay**

**kutusisaa,sidoo kale in ladhaho qofkii waxaas sameeyo naarta ayuu gelaa ama alle janada ayuu ka xarimay qofkii falkaas sameeyo in ladhaho dembi weyn ayay tusisaa. Sidoo kale waxaa dembi weyn kutusinayo axaadiithta kusoo aroorto nacladida oo ah naclad hakudhacdo qofkii waxaas saneeyo**

Isxasuusin

1:sheeg tafsiirka aayadii suuratul mulki .
2: dembiyida waa weyn si lagaaga cafiyo maxey ubaahanyihiin
6: dembiyada yaryar ayagana sida kuwa waaweyn miyaa

**Iftiimin.**

1:tafsiirka suurada waa miyaysan dadku kuwaana qaadameyn shimbiraha gorgooda ah ee marna fidinayo(baalasha) marna laabayo oo hadii ay soo dhacaane alle mooyea cidkala aysan qabaneynin.
2: towbo ayay ubaahanyihiin.
3:dembiyada yaryar waxaa kufilan istiqfaarta iyo wanaag oo lasameeyo. Rasuulka waxuu dhahay

xumaan(hadii ay idinka dhacdo) raaciya wanaag weydireeysaahe.

**2: qodobka kale ee kugaarsiinkara inaad khashuucdo waxaa kamida cidlada ama meel degen oo buuq laheyn. Hadii aad meel dad badan kubuuqayaan kudukado sheekadooda ayaad iskaraaceysaa. Marka degenaanta waa muhiim. Tusaale salaadaha kala ah salaadu duxada iyo salaadu leylka waa salaado qofkii usoo tooso khashuucayo. Sababtoo ah salaadu leylka waa xili ay dadka hurdayaan. Salaadu duxadana waa xili ay dadka howl maalmeedkooda dhexda umarayo.**

**3: qodobka kale ee khashuuca salaada kugaarsiinkara waxaa kamida inaad dhar cusub ama nadiifa aad soo xirato ayna kàa muuqado sida ay kuugu weyntahay hor istaaga rabigaa. Sidoo kale waa inaadan salaada gelin adigoo baahi kuheyso ama suuliga rabo waxuu rasuulka dhahay : "(لا صلاة بحضرة الطعام ولا وهو يدافعه الأخبثان)**

**Oo macnihiisa yahay salaad umajirto qof baahan oo cunto agtaal oo salaad gelaya iyo**

**qof celcelinayo labadii xumaa(saxaro iyo gaadi) Xadiithkan waxaa laga fahmayaa in aan salaada lagelin adigoo ay   cuntadii garsantahay oo doonayo, sababtoo ah khashuuca ayay kaa nusqaamineysaa. Sidoo kale waxaa lamid ah adigoo celcelinayo saxaro ama gaadi oo ayagane khashuuca ayay kaa nusqaamineysaa. Sidookale waa in aad halmid hilmaamin oo ah inaad barato tafsiirka. Naasiib daro waxa ah in aad kasii jeesado macnaha quraanka ayadoo meelkasta laga barankaro tusaale masjid aan kitaabada oo uu ugu horeeyo quraanka aan laga aqrin waa yaryahay.  Ama waxaad kahelikareysaa YouTubeka adigoo gashanaya magaca suurada aad rabto deedna tafsiir raacinayo Hadii aad dhihi doonto wirless maheysto iyo waxii lamida,waxaan uun hubaa in aad halmaalin free kadhigakarto deedna maalinkaas aad soo degsato jelaad qamiis(suuratul xujuraad ilaa suuratu naas)Xitaa hadii aadan laheyn telefan weyn niicalaha  memory intaad uraadsato inaad maktabad keysado deedna laguugu soo shubo tafsiir dhameystiran.**

**Halmidna waa inaad ogaataa inaad xifdisanaato suurado badan oo quraanka ah oo aadan hal aayad macnaheeda kafahmeynin ama aadan fahmeynin waxa ay ku amreyso iyo waxay kaa reebeyso, waxaa ka Muhiimsan oo kaaga qeyr badan suurado yar oo aad macnhooda baratаа kuna dhaqantaa.  sababtoo ah cilmiga asal waxaa u ah kucamal fal shey aadan barana laguma camal falikaro. Marka baro deedna kucamal fal hadiikale waxaad noqoneysaa dameer  uu malab kuraranyahay. Cilmiga kudhaqankiisa waa waajib. Marka hadii aad cilmi barato ku camal fal.**
**4:qodobka xiga ee afaraat ee khashuuca kugaarsiinkara waxaa kamida inaad dartiib u aqriso waxa aad aqrineyso si aad macnahooda udhuuxdo, hadii aad boobsiido mafahmikartid quraanka macnihiisii,xataa lafdi ahaantiisa ayaa kaa qaldamikara, marka quraanka Waa in tartiib loo aqriya allena quraanka waxuu kuyiri  ورتل القرآن تر تلا**
**Oo macnaheedu yahay quraanka sifiican u aqri oo kala dhig dhig. Hadii aad boobsiido aqrinta quraanka dhib ayaa kadhalankara.**

**Tusaale faataxada oo lagu dukado rasuulka scw waxuu dhahay buu yiri alle(xadiisul qudsi) in alle yiri faataxada waxaan uqeybiyay 2 weybood oo ah aniga iyo adoonkeyga ah oo marka uu adoonku dhaho** *alxamdulilaah rabil caalamiin(alle ayaa mahadleh), **alle** waxuu dhahayaa adoonkeyga wuu ii mahadnaqay,markaad dhahdo araxmaani raxiim, alle waxuu dhihi adoonkeyga wuu i amaanay,....* **ilaa dhamaadka sidaa buu rabigaa markaad kelmad tiraahdaba kuugu jawaabayaa,ilaa aad kasoo gaarto iyaaka nacbudu wa iyaaka nastciin, markaa buu alle dhahayaa taasi waa mida inoo dhaxeyso aniga iyo adoonkeyga adoonkeygana waxuu iweydiisto buu leeyahay. Markaas baad adigoo alle kuu balanqaaday waxaad weydiisato inuu kusiinayo baad leedahay rabiyow nagu hanuuni jidkii toosnaa iyo jidka kuwii aad unicmeysay ee aan aheyn jidka kuwii loo carooday(yahuuda) iyo jidka kuwii lumay(kiristaanka). Marka hadii aad boobsiido waxaa kuseegikara wanaaggaas.**
**5: inyar aamusida:qodobka kale waa in aad waxyar aamusto.salaada waxaa kamida**

**waqtiyo 6 mar ah oo la aamuso waxeyna kalayihiin 1:inaad aamusto xoogaa yar markaad xirato salaada oo allaahu akbar dhahdo iyo ducada furfuraahada ah.**
**2: ducada furfurashada markaat aqriso inaad xoogaa yar aad aamusto kadibna aqriso tacawudka ama coodu bileysiga( acuudu bilaahi mina sheydhaani rajiim).**
**3:markaat coodu bileysato iyo aqrinta faatixada in xoogaa yar oo aamusid ah dhexgeliso. 4: markaat faataxada aqriso oo aad mareyso walallaaliin inaad waxyar aamusto deedna aamiin dhahdo. 5: aamiin marka aad dhahdo iyo aqrinta suurad kale inaad ayagana dhexdooda waxyar aamusto.**
**6: suurada kale ee aad aqrisay iyo rakuucda inaad xoogaa yar oo aamusid ah udhaxeeysiiso.**

## Isxasuusin

**1**:sheeg 3 qodob oo khashuuca salaada kugaarsiinkara? 2: waa imisa tirada inta jeer ee waxyar la'aamuso salaada dhexdeeda?. 3: adiga oo suuli rabaa oo saaid ugu baahan ama baahi daran kuheyso salaad oo waqtigeedii

waasac yahay inaad gasho makuu banaantahay?

**Iftiimin.**

1: meel degen, fahanka waxa aad kudukaneysid, dartiib u aqrinta quranka.
2:6 jeer 3:maya. Inta aan qodobkan kabixin waa in aad  attaxiyaatka iyo tasbiixda rakuucda iyo sajuuda tafsiirkooda barataa sababtoo ah ayagana khashuuca waa looga baahanyahay.

## Waxyaabaha kaa fogeynkara khashuuca

Waxyaabaha kaa fogeyn kara khashuuca salaada waxaa kamida caksiga(kasoo horjeedka)  waxyaabaha khashuuca kugaarsiinkara. Sidoo kale waxaa kamid ah

1:istustuska(shirkul asqar) istustuska mabanaana  xiliga salaada iyodhamaan acmaasha kale. sidoo kale waa inaad niyada kuheysaa in uu camalkaaga uu burinkaro istustuska. Nabigana wuu kadigijray oo xitaa saxaabadiisa oo umadda ugu kheyr badan buu kudhihi jiray waxaan idiinka baqayaa sheyga ugu daran ee dadka looga baqo oo ah shirki asqarka(gaalnimo yar) markaas bey yiraahdeen rasuulkii allow waa maxay shirki asqarka

(gaalnimada yar ) markaas buu kudhahay rasuulka scw waa istutuska. أن رسول الله صلى الله عليه وسلم قال: (إن أخوف ما أخاف عليكم الشرك الأصغر) قالوا وما الشرك الأصغر يا رسول الله؟ قال الرياء
Marka waa inaad iska ilaalisaa istustuska qaasadan midka cibaadada dhexdeeda ah.

## Xukunka istustuska

**Culimada waxey sheegeen axkaam kadhalaneyso hadii uu cibaadada istustus uu galo axkaam taasna waxay kalayihiin**
**1:in salaada markii horeba aad istustus usoo gashay. Ruux muslim ahna kama suurtowdo in uu soo weyso qaato uu salaad xirto asagoo intaas oo dhan istustus usameynayo,balse hadii ay dhacdo salaadas wey ka burtay oo kama ansaxmeyso.**
**2: qodobka kale waxuu yahay in uu si ikhlaas ah uu salaada kusoo galay deedna markuu dhexda marinayo sheydhaan qaluubta ugeliyo istuustus, hadane labo ayaa loosii kala qaadayaa oo kala ah A:cibaado kala go'ikarto B:cibaado aan kala go'ikarin. A:hadii ay tahay cibaado kala go'ikarto sida jihaadka, sadaqada lwm,**

**markaas istustuska halihii uu galay ayuu burinayaa, tusaale jihaad ayaa kujirtay adigoo gaaladii gelinkii hore( subixii inta u dhaxeyso 1 saac ama laba iyo tobankii  ilaa 6 saac ayaa gelinka hore ladhahaa) ayaa si khaalis ah ula dagaalantay,oo jabweyn ayaa gaarsiisay,deedna waa lagu ammaanay, kadib ayaa gelinkii dambe( galabtii) udagaalantay adigoo niyada iskadhahaya war sidii saaka halaguu ammaano, oo dadkii iskagadaya ayaa jihaadkii gashay,xukunka jihaadkaagu waa laba qeybood qeybtii subixii oo saafiga kuu aheyd waa kuu ansax laakiin qeybtaan kale markii aad niyada iska dhaheysay halagu ammaano xiligaas hadii aad sheydhaanka isnaartay allena talasaaratay waa kuu ansax iyadana,laakiin markuu sheydhaanka qalbiga xumaanta istustuska ah kaagelinayay hadii aad qalbuuta usii furtay oo aad sii macaansatay jihaadkii galabtii aad gashay ee istustuska ahaa wuu kaa buray.**
**Tusaale kale adigoo heysto lacag laba boqol ah (200) ayaa nin ku sadaqeyso rabtay, adigoo boqolkii koowaad si saafi iyo ikhlaas**

**ah ugu diriyay ayuu sheydhaan qalbiga kaasoo geliyay in dad badan ay agtaada joogaan ee ugu faan kadibna boqolkii labaad baa udirisay adigoo kufaan isdhahaya, xukunka lacagtaasi waa:boqolkii koowaad asaga hadal kama daagno oo waa kuu ansax, laakiin boqolkii labaad markii uu sheydhaanka qalbiga istustuska kaagelinayay hadii aad iska naartay oo ikhlaaskii kusoo laabatay asagana waa kuu ansax, laakiin hadii aadan iska naarin ee istustuskii aad kubixisay boqolkii dambe wey kaaburtay sadaqada boqolkii dambe.**
**B:cibaado aan kala go'aynin sida salaada iyo soomka. Hadii uu istustus kaasoo dhexgalo, kadibna aad islamrkiiba iskanaarto oo aad ikhlaaskii kusoo laabatay salaadaas dhamaanteed waa ansax. Amaa hadii aad sii macaansatay hadalka sheydhaanka oo aad qalbiga ufurtay dhamaan salaadaas waa mid aan ansax aheynin.**
**Marka waa sidaa axkaam teeda,waxii faa faahin ah waxaad kasii aqrisakartaa sharaxa kitaabka arbaciinka xadiithka koowaad ee ibnu rajab.**

**Waxaa kale oo qashuuca kuu diidikara qodobadii aan soo xusnay sida meel buuq ah, adigoo culeys kuhaayo sida suuliga ama baahi. Sidoo kale waxaa kamid ah inaad meel kuleel ah ama qoraxda ay saaid ukulushahay aad kudukado,taas ayadana khashuuca ayay kuu diidi kartaa rasuulkana waxa uu nasiiyay ruqsad aan salaada kuqaboojin karno ama meel qabow ku aadikarno oo rasuulka waxuu dhahay:قال رسولُ الله صلى الله عليه وسلم: ((إذا اشتدَّ الحرُّ فأبرِدوا بالصلاة، فإن شدة الحر من فَيح جهنَّم))؛ متفق عليه ...**
**Oo macnihiisa yahay hadii uu kuleel daranjiro salaada qaboojistaha( yacni xili yara qabow dukada ama meel qabow kudukada)maxaa yeelay kuleelka darani waxuu ka ahaaday neefta jahanamo e,marka si aad khushuuca salaada uhaleesho waxaa haboon inaad kudukado meel qabow.**

**2: was-waaska: qodobka 2aad ee khushuuca Kaafogeynkara waa was-waaka, was-waasku waa cudurka ugu xun ee cibaadada gala kadib istustuska .**

**Waana cudur  aan gelin salaada oo geliya ee gala meelo badan sida dhahaarada,weysada,mucaamalaadka iwm.**

**Was-aaska haduu markubarto wey adagtahay inuu kaadago,ilaa inaad la imaado asbaabaha looga xoroobo was-waaska.**
**Dad badan ayuu kudhacay baa la yiraahdaa, qofkii uu kudhaco was-waaska kama baxayo faniin ayaa isoo gaaray anigoo weyseysanaya, mise nijaas baa isoo gaartay, was-waas hadii uu kugudhaco waxaad udhaqmeysaa sidii qof aan caqli laheyn, wuxuuna kubadanyahay badanaa dadka aan cilmiga xoogaa kabaranin,**
**Qiso yar oo sheeko igu soo gaartay aan kaaga  warama oo kusaabsan**
**Was-waaska,  nin baa  hada kahor waxaa kudhacay was-waaska waxuuna kagalay dhanka cibaadada qaasadan dhahaarada, ninkii dhar ayuu dhaqdaa oo uu dhaahirsadaa si uu ugu dukado, markasta uu weyseynayo ama istijoonayo waxuu dhahaa dharkii baa iga nijaasoobay oo nijaas baa isoo gaartay,**

**Dadkii guriga lajoogay sida xaaskiisa iyo caruurtiisa kuma aaminayo iney udhaqaan,oo waxa uu aaminsanyahay ineysan nijaasada sifiican ay uga dhaqeynin. Ninkii marba wuu baxaa oo wabiga mise badda oo udhow( ma xasuusti wabiga miyaa udhawaa mise badda)**
**Ayuu uun dharkii uqaadaa subaxkasta si uu usoo dhaahirsado, halkii shey ayuu waqti dheer dhaqayaa asagoo aaminsan ineysan ka go'eynin ciyow nijaasada, markii uu soo qalajisto guriga ayuu geensadaa, markii uu keeno guriga hadane waxuu niyada iskadhahayaa war dharkaan maba dhaqin niyoow ee adigaa umaleeyo, kadib maalinka uu dharka soo dhaqo waxa uu weeydiyaa ciyaal badda agteeda ku ciyaarayay adeer aniga oo saaka dhardhaqaya ma i aragteen. Sheekadaan hadaa fiiriso kabadbadis ayay kuula egtahay laakiin culimo ayaan ka maqlay, marka ninkaan runtii xaalad xun ayuu kalay, xasuusnow aniga horey waxaan kuusoo dhahay was-waaska haduu kugu dhaco waxaad udhaqmeysaa sidii ruux aan caqli laheyn oo kale.**

**Hadii aad dib uraacdo taariikhda was-waaska waa mid qotodheer, oo maaha wax gadaal dambe ka imaaday,oo wuxuu jirijiray 14 qarni kahor(xiligii rasuulka ayuu  jiri jiray) sidaa dardeed looma baahno in aan adeegsano aragtiyo, iyo fikir aan anaga leenahay ee waxaan sitoosa u adeegsaneynaa  daawadii uu rasuulka inoo sheegay SCW ee sheydhaanka leysaga daweey**

## Asbaababaha looga xoroobo was-waaska

**Ugu horeyn waxaa soo qaadaneynaa hal xadiith oo aan kugusii ogeysiiyo inuusan was-waaska wax hada soo bilowday aheyn, iyo rasuulka scw waxuu kadhay.**

**عن عبد الله بن زيد بن عاصم المازني رضي الله عنه قال: (شُكِيَ إلى النبيِّ صلى الله عليه وسلم الرَّجلُ يُخَيَّلُ إليه أنَّه يَجِد الشَّيء في الصَّلاة، فقال: لا ينصرف حتَّى يَسمعَ صَوتًا، أو يَجِد رِيحًا).**

**Macnaha xadiithka(c/laahi binu zeyd binu caasim ayaa dhahay,rasuulka waxaa loo sheegay nin lamoodsiinayo inuu salaada dhexdeeda waxkuhelay,markaas buu rasuulka dhahay scw yuuna salaada kabixin ilaa uu cod kamaqlo ama ur ka urinayo)**

## SHARAXA XADIITHKA

**Rasuulka scw waxaa loo sheegay nin ismoodayo(isdhahayo) inuu salaada waxkudhex heleen, waxaasina waa aaryo(dhuuso) ayuu umaleynayaa iney ka imaatay asagoo salaada kujiro,markaas rasuulka scw waxuu dhahay yuuna kabixin qofka noocaas ah ilaa uu kamaqlo codkii ama shanqartii aaryada, ama hadii aytahay mid aan codkeeda lamaqleynin in uu salaada kabixin ilaa uu ur keeda ka dareemo,**
**Marka xadiithkan waxaa laga qaadanayaa in waxii shaki ah cibaadada waxbo udhimeynin. Sidookale waxaa jirto qaacido dhaheysaاليقين لا يزال بشك oo macnaheedu yahay yaqiin waxii kudhisan shaki waxbo kamadaro. Tusaale waad weyso qabtay kadibna waxaad kushakiday ar ameey weysadii kaajabtay, markaas oo kale waxaad kudhaqmeysaa qaacidada ah yaqiin kumasuusho shaki, oo waxaad dhaheysaa soo horta mahubinoo in aan weysoqabay jawaabtu waa haa, hadane yaqiinkale miyaa hayaa oo ah iney weysada igajabtay, jawaabtu waa maya, oo maxaan hayaa,shaki soo maaha haaa igawad marka**

**weysadii wey ii jirtaa maxaa yeelay waxii lahubo ma baabi'karo shaki.**
**Marwalba gadaal unoqo waxaan markii aad bilaabeysay mahubtay, haa soo maaha kasoco makaraas shaki meeshaas goob shaah ah xitaa kama gooyee.**
**1: asbaabta aad was-waaska uga xoroobi karto waxaa kamid ah in aadan shey yaqiin ah oo lahubo aadan uga tanaasulin shey shaki kujiro dardiis.**
**2:asbaabta labaad waa in aadan adheecin warka sheydhaanka, tusaale haduu kudhaho nijaas baa kugaartay kasoco ilaa wax muuqdo ama lahubo ay kanoqoneyso. Markasta iska boojee warkiisa inta aad iska boojeyn kartid. Haduu kudhaho weysada waa qalad kudheh waa qalad ee iga dhamow(macanaha ka coodo bileyso). Haduu kudhaho salaada mid lagaa aqbalayo maaha, kudheh adiga matihid midka wax aqbala ama aan aqbalin, markasto oo waxii uu sheydhaan kuu sheego(wixii ku was-waasto) aad sax is tiraahdo waa markasta oo godkiisa aad hoos usii gaasho.**

**Waligaa shaki iyo was-waas dardiis wax ha usameyn waxna ha isaga deynin,**

**3:asbaabta 3aad ee aad uga xoroobi karto was-waaska waa adkaarta iyo quraanka.**
**Sid aan isla qabno sheydhaanka waxa uu markasto dadka kufuraa shubuhaad asagoo xoogaa xaq ah iskuqarinaya.**
**Waxuu kuleeyahay sheydhaanka samada yaa abuuray? Su'aashan waxdembi ah kuma sugna bal waaba mashruuc inaad fiiriso samada weynigeeda kadibna aad allaaha kasii weyn ayada kuxernaado, amarkiisa adheecdo.balse baadhil geligiis masoconayo mana kuula imaanayo ileen baadhil miirani waa doqonikartay e, waxuu kugusoo hoos qarinayaa xoogaa yar oo caadi ah oo dembi aheyn, kadibna sida uu kuuwado ayuu dembi ama shirki lugaha guugelinayaa, marka marka koowaad waxuu kudhahayaa samadaan yaa abuuray? Adiga waxaad dhaheysaa allaah ayaa abuuray,markaa buu kuleeyahay war dhulkana yaa abuuray, markaas baad leedahay allaah ayaa abuuray, kadibna waxa uu kudhayaa allaaha waxaan**

**abuuray asagane yaa abuuray? Nabiga waxuu dhahay markuu meeshaas marayo hadhaho qofka  alle ayaa rumeeya iyo rasuulkiisa  (aamantu bilaah wa rasuuluhu) meeshaasna haku joojiyo.**

**Marka halkaan waxaan kugula wadaagayaa 5 tallaabo oo aad isaga celinkarto was-waaska sheydhaanka 5taas tallaabo waxey kalayihiin qodoban soo socdo.**
**1:marka hore dheh alle ayaan rumeysanahay,(أمنت بالله ) alle ayaa rumeysanahay marka aad dhahdo su'aashii sheydhaanka waad kajwaabtay, oo sidee uga jawaabtay?,waxaad uga jawaabtay alle ayaa rumeeysanahay markaat leedahay waxaa soo galaya hadalkaagaas alle ayaa rumeeyasanahay hadalkiisa(quraanka) waan rumeysanahay,quraankii hadii aad rumeysantahay soo quraanka madhahayoo alle lamadhalin waxna muusan dhalin. jawaabtu waa haa. Markaa su'aashii aheyd alle yaa dhalay ama sameeyay waad kajawaabtay.**

**2: qododbka kale ee aad iskaga difaaci karto waa inaad aqriso suuratul ikhlaas ( qulhuwalle)**
**3: dhankaaga bidix uduf candhuuf 3 jeer.**
**4: coodo bileyso**
**5: islahadalkii meeshaas kujooji.**
**5taan tillaabo hadaa sameyso insha allaah adiga iyo sheydhaan isma arkeysaan**

**N.B Qodobka 3aad ee ah dhankaaga bidix uduf candhuuf 3 mar. Waxaa muhiima in aan xoogaa yar faahfaahino. Horto halmid ogow sheydhaanka waxa uu kugu soo weerarikaraa meelkasta, sida adiga oo dad akhyaara kudhexjiro,adigoo qolkaaga kudhexjiro,adigoo masjid kujiro. Markaas oo kale miyaa dadkii akhyaarta aheyd ee dhanka bidix kaa jirey maku candhuufeysaa? Mise inta aad isdaagdo ayaa baxeysaa? Hadii aad tiri waan baxayaa balkawaran adigoo salaad kujiro miyaad kabaxeysaa saladaa?**
**Jawaabta aan kusiiyo marna lama baxaayo,dadkana laguma candhuufayo. Ee waxa aad sameyneysaa waxyar oo candhuuf**

**ah waaye. Haba noqoto haldhibic oo aad uyare, waxyar oo dadka aan gaarikarin, meeshii ay kudhacdana kamuuqakarin ayaa dufeysaa. Waxaadna sameey kartaa goorkasta iyo goobkasta xitaa adigoo salaada kujira hadii aad was-waasto 3da mar ayaad bidixdaada udufeysaa. Laakiin niyada kuhaay waxii aan soo sharxayay ee ahaa in ay candhuufto noqonin candhuuf weyn oo adiga kuhaleynkarto ama dadka haleynkarta,**

## Isxasuusin

**1: sheeg labo kamida waxyaabahah kaa fogeynkara khashuuca**
**2: waa maxay was-waas?**
**3:xiligii nabiga majirijiray was-waaska**
**4:hadii aad fahantay qaabka aan usoo kala qaadnay acmaasha uu istustuska galo,kajawaab su'aashaan, anigoo taabuur quraanka aqrinaya baan isdhahay codkaaga qurxi si aad ugu faanto codkaan macaan. Aqrinta quraankaas ajar maka helayaa.**
**5:candhuufta dhanka bidix loo dufayo mid weyn miyaa**

**6:sheeg labo kamida asbaabaha looga xoroobo was-waaska**
**7: su'aashaan kama jawaabikartid waana kuqasbantahay inaad iskadeyso ama dib ugu noqoto buugga. Laakiin hadii aad adigoo buugga kunoqonin ama fiirinin qeybta iftiiminta kajawaabtay, waxakamidahay dadka aadka utirada yar ee 3 qof gaareynin ee su'aashan kajawaabo. Su'aashu waxeytahay, sheeg saxaabiga dhahay rasuulka waxaa loo sheegay nin ismoodayo inuu salaada dhexdeeda kuhelay walax( aaryo) deedna nabiga wuxuu dhahay yuuna salaada kabixin ilaa uu kamaqlo cod ama kadareemo ur. Waxaa lagaa rabaa magaca saxaabigaas. Maka jawaabtay,**
**8: sidookale su'aashan wey yara adagtahay, hadii aad kajawaabi weyso waa sidii hadii aad kajawaabtana waa mahadsantahay, su'aasha waxey tahay waxaan soo qaadanay 5 qodob oo was-waaska sheydhaanka looga hortago bal ii sheeg qodobkii 3aad kajawaab adigoo aan fiirin iftiiminta su'aalaha kuna laaban buuga**

**Iftiimin:**

**1:was-waaska iyo istustuska**
**2:was-waaska waa cudurka ugu xun ee dadka cibaadada uga dhaco istustuska kadib**
**3:haa wuu jiray**
**4:quraankaas ajar kumalihid,sababtoo ah aqrintaas yar makala go'do**
**5:maya**

**6: 5tii qodob iyo in aadan adheecin hadalka sheydhaanka**
**7:cabdulaahi binu zeyd binu caasim**
**8:waxuu ahaa dhankaaga bidix uduf candhuuf 3 jeer**

## Waa maxay farqiga udhaxeeyo shirki akbar iyo shirki asqar

**Markii rasuulka scw la weydiiyay waa maxay shirki asqarka waxuu dhahay waa istustuska, istustuskana salaada ayuu galaa maadama aan halkaan salaada uga hadleyno waa in aan baranaa shirki asqarka iyo shirki akbarka si aan isaga ilaalino marka waxaa muhiim ah inaa isla fahano waxa laga wado shirki asqar(gaalnimo yar) iyo**

**shirakbar(gaalnimo weyn) hadaba waa maxay labadaan shirki/gaalnimo farqiga udhaxeeyo.**

**Shirki asqar: waa gaalnimo kayar gaalnimada weyn taas oo loo yaqaano shirkul asqar. Hadaba waxey gaalnimada weyn ama shirkul akbarka uga duwantahay 4 shey oo culimada fiqiga ay sheegaan oo kala ah**
**1:horta qofka kudhaca shirki asqarka diinta kama baxayo oo manoqanayo gaal dhiigiisa, maalkiisa banaayahay manoqonayo.**
**2: camalkii horey usoo sameyjiryay kamaburayo(ka jebi maayo) midka soo socdana wuu kaa ansaxmayaa(waa lagaa aqbalayaa)**
**3:naarta dertiisa looguma waaro: shaki kuma jiro in ruuxa gaalnimo kudhintaa( shrikul akbar) inuu naarta kuwaarayo weligiis oo quraanka ayaaba sheegay oo quraanka waxaa kubadan in gaalada aayadaha kahadlaahi ay kudhamaadaan(khaalidiina fihaa abadan),marka shirkul asqarka kaasi waa kaduwanyahay oo ruuxii kudhintaa alle**

**haba kusoo kululeeyo naarta intii uu doono laakiin waa qof muslima oo weli diinta kabixin oo mar uun janada wuu imaanayaa, Maadaama uu yahay ruux galimatu towxiid kudhintay, laakiin shirki asqarkaas uu kudhacay waxey kugeeni kartaa inuu alle kuciqaabo, allena wuu udhaafi karaa haduu doono maadaama oo kusoo dhintay iimaan iyo yaqiin .**
**Waligaa intaad iska dhowri karto iskadhowr.**
**4:qodobka ugu dambeeyo ee shirki asqarka iyo shirki akbarka ay kugala duwanyihiin waa TOWBADA shirki asqarka towbad keenid sharti uma ahan oo waxaaba kufilan oo baabi'ikara tasbiixda,istiqfaarta,weyso qaadka,misaajid usocoshada IWM.**

## TUSAALAYAAL SHIRKI ASQAR AH:

**sheykasta si qotodheer inloo fahmo hadii larabo waa in asaga la sharxaa tusaalena laga bixiyaa si tusaalahaas waxii kaasoo horbaxo aad uga qiyaas qaadato,marka waxaan isla fiirineynaa dhowr shirki asqar ah oo dadkana ay isaga badanyihiin iyo daliilkooda kutusaya in ay waxaasi shirki**

**yihiin tusaalaha 1: waxaa shirki asqarka kamida inaad kudhaarato wax aan alle aheyn ama wixii alle kasoo hara oo dhan, waxaana daliil u ah in shirki tahay dhaarta makhluuqa lagu dhaartaa hadalka rasuulka scw ee ah قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: ( من حلف بغير الله، فقد أشرك )، Oo macnahiisu yahay (qofkii kudhaarta alle waxaa aheyn shirki buu kudhacay)**
**hadane waxaad arkeysaa soomaalida oo isaga dhaaraneyso alle waxaan aheyn sida nabi,malaaik, owliyo,xoolo iyo waxii lamida tusaale waxaad arkeysaa qof kudhahaya ilaahey iyo rasuulka waxaas masameynin,bal waa karanay alle in lagu dhaarto laakiin rasuulka asagana alle labaad miyaa, jawaabtu waa maya, Tusaale kale waxaad arkeysaa qof dhahaya shaqsigaan waa saxiibkeyga aan kudhaarto. Taasi ayadana waa shirki kale.**
**N.B qofkii alle waxaan aheyn kudhaarta wuu shirki buu kudhacay loolama jeedi shirki akbarkii diinta looga baxayay ee waa shirki asqar.**
**2:shirki asqarka waxaa kale oo kamida inaad qof aabahaa aheyn aad sheegato adiga oo**

**og inuusan aabahaa aheynin, taas badelkeedana raba in uu wax kuheesto uu wakiilkaaga noqdo,markaa ayaa lagu dhahay keen aabahaa deedna nin kale ayaad wadata kasoo qabsatay adigoo dhahaya waa kan aabahey, ama adigoo raba inaad wadanka uga dhoofto, ama raba inaad lacag kuqaadato, IWM. in aabahaa qof aheyn aad sheegatana waxaa daliil u ah xadiithkan**
**قال رسول الله : ليس من رجل أدعى لغير أبيه وهو يعلمه إلا كفر**
**Xadiithkan oo macnihiisa yahay(majiro qof sheeganaya aabihiis aabe aan aheyn asaga oo og inuusan aheyn aabihiis ilaa haduu jiro wuu gaaloobayaa qofkaas)**
**Xadiithkan asaga waxaan kadhadhansaneynaa in aabe kale in la sheegto,ineysan aheyn hadal sahlan oo laga digdoonaado. Ruuxii sheegto asagoo maslaxo aduunyo kuraadinayo aabihiis aabe aan aheyn hadaba haka istiqfaarsado shirki asqarkii buu kudhacaye.**
**3:tusaalaha kale ee shirki asqarka kamida waxaa waaye inaad qofka aad nasabkiisa(ehelkiisa/xididkiisa/qabiilkiisa intuba waa iskumacno) aad kudurto ama**

**aad waxa uga sheegto ama aad caayso, waxaana udaliil xadiithka rasuulka scw ee ahaa:عن أبي هريرة رضي الله تعالى عنه عن النبي ﷺ أنه قال: اثنتان في الناس هما بهم كفر: الطعن في النسب، والنياحة على الميت .**

**Xadiithkan macnahiisa waa(labo shey oo dadka ay kusuganyihiin waa gaalnimo labadaas oo ah durid qofka nasabkiisa( ehelkiisa) lagu duro(wax laga sheego ay dhibsanayaan)iyo baroor meydka lagu kor baroorto)**

**SHARAXA XADIITHKA: rasuulka scw waxuu halkaan kusheegay labo shey oo dadka kubadanyiin oo ah in qofka nasabkiisa oo ay ugu horeeyaan hooyadiis, aabihiis,walaalhiis,qabiilkiisa, ay tahay gaalnimo yar(shirki asqar) iyo in meydka lagu gor baroortaa ay halis tahay. Aan u imaano midahore oo ah in qofka nasabkiisa la duro horto arintaan aad iyo aad bey inoogu badantahay,qaasadan waxey kubadantahay labo koox oo bulshada kamida oo kala ah 1:odoyaasha badanaa qabiilka oo waxlaga sheegaa duqeyda( waayeelada) wuu kubadanyahay,xiliyada uu**

**aadka ugu badanyahayna waxaa kamida xiliyada doorashada, xiliyada dagaalada sokeeye, xiliyada fadhi kudirirka(in meel laysugu yimaado ayadoo macnadaro layahay oo wax dan ah oo leysugu yimaadaahi aysan jirin).**
**2:kooxda labaad oo kubadanyahay nasab caayga waa dhalinyarada,xitaa aan aniga makaraan ah aan iska reebeynin,balse alle hanoo dembi dhaafo dhamaandeeno. Xiliyada uu nagu badanyahay waa xiliyada kulamada lakulmo sida ciyaaraha,waxbarashada marka laga reebo mida diiniga ah IWM. Horta waxaa alxamdulillaah ah in sifudud dembigiisa lagu dhaafo sida tasbiixda,weysada IWM. Bal hada aynu islafiirino suurada ama qaabka uu shirki aqarka uu lee yahay, aniga fikirkeyga iyo malo aniga aan maleynayo idinku qanci maayo ee waxaan soo xiganayaa hadal uu dhahay saxaabiga weyn alle hakaraali niqdee cabdulaahi bin cabaas hadalkaas waa sidan:قال ابن عباس في الآية: "الأنداد: هو الشرك، أخفى من دبيب النمل على صفاة سوداء في ظلمة الليل". وهو أن تقول: والله وحياتك يا فلان، وحياتي، وتقول: لولا كليبة هذا لأتانا اللصوص.**

**ولولا البط في الدار لأتانا اللصوص. وقول الرجل لصاحبه: ما شاء الله وشئت. وقول الرجل: لولا الله وفلان. لا تجعل فيها فلانا; هذا كله به شرك" رواه ابن أبي حاتم. Macnaha oo kooban (ibnu cabaas waxuu yiri "andaadka" waa shirki,shirkigana waxa uu ka qarsoonaan badanayahay raadka quraanjo  ama tisxiga, quraajadaasoo kusocod dhagax madow hebeen madow,shirkigaasna waxuu noqokaraa sida in uu qofka dhaho:alle ayaan kudhaartay iyo noloshaada iyo nolosheyda ayaan kudhaartay hebelow,iyo inuu qofka dhaho haduuna jiri laheyn eeygaan yar (eey/yey) waxaa inoo imaan laheyd duugo,iyo inuu dhaho hadalkaan oo kale: hadii ay boolo booladaan guriga joogi laheyn duugo ayaa inoo imaa laheyd,inuu qofka kudhaho saaxibkiisa haduu alle doono adigana aad doonto(waxaasi wey ahaanayaan),iyo inuu qofka dhaho hadii uu alle jirilahayn iyo hebelba(wax inooma hagaageen), hadalka hakuderin hebelow maxaa yeelay dhamaantiisa waa shirkiye)**

**SHARAXA XADIITHKA**

**Horto ibnu cabaas waxuu fasirayay aayada kujirta suuratul baqara aayada 22 oo dhayeso فلا تجعل لله الأنداد(ha yeelinin shey aad alle lamid dhigto) marka ibnu cabaas waxuu fasirayay ereyga "andaad" markaas buu yiri eregaasi waa shirki(shirki akbar ah), markuu intaas yiri ayuu waxa uu gudakalay inuu sharxo shirki asqarka markaa buu yiri cabdulaahi bin cabaas:shirki asqarka waxuu ka qarsoonaan badanyahay raadka quraanjo. Waliba quraanjada hadii ay dhulka kusocoto, waxyar oo raad ah in la arko weydhicikartaahe quraanjadaas oo kusocoto dhagax, dhagaxaas oo hadane madow haduu cadyahay waxyar oo  wasaqdeeda ah ama dheecaankeeda ah ama il ma aragto ah in la arko ayaa dhicikartee dhagax madow. Hadane dhagaxa madow hadii maalin lajoogo in wax uun la arko oo raadkeeda kamida ayaa dhicikartee dhagaxaas oo habeen ay kusocotay. Waxaana kamid ah hadalada uu shirki aqarka kuqarsanyahay hadalkaan:alle ayaan kudhaartay iyo noloshaada iyo nolosheyda hebelow.**

**Waxyar joog hadalkaan xagee ayuu shirkiga kagajiraa?**

**Waxuu uga jiraa jumlada ah (nafteyda iyo naftaada) horay waxaa usoo sharaxnay in alle wax aheyn lagu dhaarakarin balse hada naftaada alle maaha nafta qofkale alle maaha sidaa dardeed hadalkaasi waa shirki.**

**Hadalka kale uu ibnu cabaas uu tusaalaha usoo qootay uu sheegay in hadalkaasi shirki yahay waa jumlada ah "eeygaan yari haduuna joogi laheyn duugo ayaa inoo soo geli laheyd". Joogso bal kasoo saar**

**Halka uu shirkiga kaga suganyahay, waa asbaabtii ayuu qadar udiiriyay. Dabcan guryaha qaar habeenkii eeyo ayaa lagu waardiyeeyaa,eeyahana hadii ay duug arkaan wuu qeylinayaa, eeyahaasi waa sababtii duuga looga badbaadi lahaa ee maaha eeyga inuu badnaadiye yahay,sheyga inuu sababta wax lagu badbaadiyo inuu noqdo waa dhicikartaa laakiin kii badbaadinayay manoqonkaro, tusaale debka**

**waa waxa sababa inaad raashin karsato laakiin raashinkaas qof ayaa gor kamaamula oo cusbo kudaro,oo gedgediyo, oo kasoo dejiya,marka cuntadaas yaa kariyay ma dabka ayaa kariyay? Jawaabtu waa maya ee heblaayo ayaa soo garisay ayadoo gaalmada eebe ay lajirto. Marka kalmadii aan u noqono halka uu shirkiga kaga suganyahay waa in asbaabtii uu kadhigay mid iyada waxtarta uuna ilaabay allahii eeyga kaqeylasiiyay markuu duuga arko, allaha energy(tamar) uu kuqeyliyo eeygaas siiyay,allaha caafimaad uu kuqeyliyo siiyay.**

**Kalimada xigta ee shirkiga kujiraa ee saxaabiga sheegay waa " hadii ay boolo booladaan guriga joogi laheyn duugo ayaa inoo imaa laheyd " horta boolo boolada waa mida aan unaqaano somali ahaan magacyadaan (wiiro-wiiro, weedo- weedo, xiita- xiito, quuto quuto) dhamaan magacyadaas waa loo yaqaan. Habeenkiina maseexado oo weysoo jeedaa, baadiyaha xiliga dambe ee habeenkii markii uu waraabaha damco inuu ariga labaxo**

**ayada ayaa qeyliso. Sidoo kale duugadana hadii ay aragto iney qeyliso ayaa dhacda. Marka kelimada halka uu shirki asqarka uu kaga suganyahay ayaa ah inuu qofka kadhigay wiira-wiirada mid ayada waxtartay ama wax kacelisay uuna hilmaamay allaahii ayada kaqeylisiiyay asagana kusoo toosiyay si uu xoolahiisa u difaacdo.**
**Kelmida ugu dambeyso ee saxaabiga tusaale ahaan ukeenay waa inuu qofka dhaho alle haduu doono adigana aad doonto.**
**Joogso hadane kasoo saar hadalkan shirki?**

**Halka uu shirkiga uu kaga suganyahay waa inuu alle kadhigay in qadarka lalaleeyahay oo labadooda kadhaxeysiiyay doonista. Sababtoo ah doonista alle uu shey kula doonaa waxkuma xirna. Hadalkan waxuu udhignaa sidaan "hadii uu alle doono adigana aad doonto " marka alle muxuu uga baahanyahay waxii uu doono uu qofkale uu doono mise uu doonin. Laakiin waxyar oo baraarujin ah waxaa kuu banaan inaad tiraahdo waxii alle doono wey ahaanyaan kadibna adiga aad doonto. Kelimadaan**

**waxey kelimadii hore ay kaga gedisantahay waa in kelmadii hore ladhahay adiga iyo alle isla doontaan, laakiin kelmidaan waxaa kamuuqato kala horeeysiin ah inaad dhahday inuu alle dooney( yacni xukunkii alle wuu dhacay) kadibna adiga aad doonto(yacni qofkii xukunka kuduldhacayay aad tiraahdo adigana aad sameysid ileen laba gooraba wuu sameylahaay oo alle ayaa soo qadaraye) wey banaantahay kelimadaas. Luqada carabiga uu xadiithka kusoo arooray waa sidan عن قُتيلة: أن يهوديا أتى النبي ﷺ فقال: إنكم تشركون، تقولون: ما شاء الله وشئت، وتقولون: والكعبة. فأمرهم النبي ﷺ إذا أرادوا أن يحلفوا أن يقولوا: ورب الكعبة، وأن يقولوا: ما شاء الله ثم شئت رواه النسائي وصححه.**
**Macnaha xadiithka oo kooban( nin yahuudi ah baa rasuulka uyimid kadibna kudhahay:adinka alle ayaad ushariik yeesheen,maxaa yeelay waxaad dhahesaan hadii uu alle doono adigana aad doonto,iyo kacbada ayaan kudhaartay)**

**SHARAXA OO KOOBAN**

**Qisadaan waxey dhexmartay nin yahuudi ah oo gaal ah iyo nabigeena muxamed swc. Horta qof waliba xaalada uu kusuganyahay**

**wuu garanayaa, marka ninkaan gaalnimo ayuu kusugnaa,deedna rasuulka ayuu usheegay in saxaabadiisa ay dhahaan,hadii uu alle doono adigana aad doonto waxaas wey ahaanayaan, iyo markii ay dhaaraayaan iney dhahaan kacbada ayaan kudhaartay, kadibna rasuulka scw waxuu saxaabada amray iney dhahaan alle wuxuu doono kadibna adiga aad doonto wey ahaanayaan,iyo markii ay dhaaranayaan iney dhihin kacbada ayaan kudhaaranay ee ay dhahaan allaaha kacbada leh baan kudhaartay)**

**WAXYAABAHA XADIITHKA LAGA QAADANAYO:1:iney yahuuda xaqa ogaankarto iyo gaalada kalaba ayagoo gaalnimadooda kusugan. Oo ayaga ayaaba hada arintaan bannaanka keenay**

**2: in ruuxa gaalka ah waxii wanaagsan laga qaadakaro,oo hadalkaan markuu yahuudiga gaalka ah uu dhahay rasuulka scw kumuusan celinin bal saxaabadii ayuu amray.**

**3: farqiga udhaxeeyo dhanka naxwaha luqada carabiga xarfaha kala ah(ثم) iyo (و) oo**

**hadii ladha MAASHAA ALLAAH WA SHI'TA alle iyo makhluuqiisa ayaa hal waaw leyskula cadfay.Laakiin hadii ladhaho maasha allaah thuma shi'ta wax uu hadalkaas faaideynayaa kala dambeyn iyo in hal qof go'aanka uu leeyahay. Waxii faafaahin ah ugu laabo kitaabka ajruumiga iyo xaruufu cadfiga.**

**Sidookale rasuulka scw waxuu yiri وعن أبي سعيد مرفوعا: ألا أخبركم بما هو أخوف عليكم عندي من المسيح الدجال؟ قالوا: بلى، قال: الشرك الخفي؛ يقوم الرجل فيصلي فيزين صلاته لما يرى من نظر رجلاليه رواه أحمد.**
**Xadiithkan macnahiisu waxuu yahay( in inuu rasuulka saxaabada kuyiri miyaan idnkaga warameyn waxa aan idiinkugu cabsida badanayah oo masiixutajaal idinkaga sii cabsida badanahay haa ayay dhaheen,markaa buu dhahay waa shirkga qarsoon,waana inuu qofka u isdaago salaad kadibna uu qurxiyo ,una qurxiyo aragti dardeed uu arkayo ruuxkale.)**
**SHARAXA XADIITHKA**
**horta xadiithkan dacfi ayaa kujira ayaa ladhahaa sanadkiisa,daciifnimada kadib, waxa uu natusayaa in salaada oo lagu jiraa**

**uu imaamku dadka gadaashiisa kudukanaya ay waswaasikaraan,**
**Codkiisana uu qurxikaro asagoo ugu faanayo dadka uu dujinayo.**

**Isxasuusin**

**1: shirki asqarka towbo sharti ma utahay**
**2: tusaale kageen hadal uu shirki asqar kujiro.**
**3:shirki asqarka diinta malooga baxaa?**
**4:naarta maloogu waaraa shirki asqarka 5: acmaashaadii hore iyo mida soosocoto wax ma udhimayaa shirki asqarka 6:ruux gaalka ah hadii uu hadal aan shareecada diidaneyn haduu sheego malaga qaadakaraa?**
**7: qofka asaga oo lunsan malagayaabaa inuu hadane xaqii karto uu hadane kasii kibro.**
**8: tilmaam suurada ama qaabka uu ku imaakaro shirki asqarka**

**Iftiimin**

**1: maya 2:haduu uu hebel gaarigaan iga badbaadi  laheyn saacan waa dhimalahaa**
**3:maya 4: maya 5: maya 6:haa 7: haa.**
**8: waa qaab aad uyar oo kasii yaraan badan jilacso raadkeeda oo dhagax kusocoto oo madow oo hadane habeen ah.**

## Shirki akbar

**Maadaama aan khashuuca salaada kasoo hadleynay aana soo gaarnay waxyaabaha kaa fogeyn kara khashuuca uu kamid ahaa istustuska oo ah shirki asqar, hadii aad kusii jirtana ay dhicikarto in ay salaadaada burto, Waa in aan wax kabaranaa asagana shirki akbarka**
**Ugu horeyn shirki akbar ah hadii uu qof kudhaco asagoo hore muslim u ahaa, waxa uu noqonaya murtad diinkii alle karidoobay, hadii uu jiro hogaan(madaxweyne) xukunka alle wax kufuliyaa waa in uu soo qabtaa waaniyaa uu towbo kadalbaa ilaa 3 mar hadii uu kanoqto gaalnimadii waa sidii larabay hadii kale waa in xadka laga oofiyaa. Intaas waxaa kubaxay hal farqi oo udhaxeeyo shirki asqarkii cibaadada geli jiray iyo midkaan.**
**N.B dilkiisa,xalaaleynta maalkiisa iyo waxii axkaam laxariiri madaxweynaha ayaa kushaqo leh, shacabka waxbo kamagelin, xadna ma oofikaraan ayaga.**

**Intaas waxaa ilakalay shirki asqarkii aan soo ogaanay in masiixu dajaal xitaa nalooga cabsi badanyahay uu salaada kalo si aan ufahanana waxuu nala soo kalay shirki akbar(alle ayaan kamagan kalnee) si aan asagana fahan uga qaadano ugana dikdoonaano qatartiisa, waxaan halkaan kusheegi 4 shey oo uu uga duwanyahay shirki asqarkii,**
**1:diinka ayaa looga baxaa**
**2:camalkaagii kadaale ee intaas oo sano soo qabajirtay wuu burayaa.**
**3: naarta in uu kuwaaro ayuu qofka kusababaa**
**4:towbo ayuu ubaahanyahay maadaama uu yahay ruux aadame ah dembi uu kalo kan ugu weyn .**

**SUUARADA SHIRKI AKBARKA**
**Suurada ama qaabka shirki akbarka waa qaab weyn oo badanaa dadka kaqarsoomi karin .**

**Tusaale yaal shirki akbar**

**Waxaa tusaale unoqokaro shirki akbar qodobo culimada sheegaan,xitaa  sheekha ladhaho sheekh Maxamed cabdi wahaab kitaab dhan ayuu ka alifay, waxaana kamida shirki akbarka oo diinta looga baxo,in cibaadada alle loo leexiyo cidkale loo leexiyo. Waxaa kale oo diinta kabaxaya ruuxii gaalada u arka iney saxanyiihiin,oo caqiidadooda u arka iney saxanyiin,. waxaa kale oo diinta kabaxay ruuxii aamina in hadyigii nabi muxamed scw waxkafiican iney jiraan,ama  shareecada wax kafiicani iney jiraan aamina,waxaa kale oo diinta kabaxaya ruuxii kujees jeeso waxa kamida waxii uu layimid nabi muxamed. Waxaa kale oo diinta looga baxaa sixirka, IWM.**

**Muhiimada waxey aheyd inaan kahadalno salaada iyo khashuuceeda, bals maadaama uu salaada gelikaro istustus oo ay shareecadana utaqaano shirki asqar ayaa nagu kalifeyn inaa sii dhexgelno masaa'il fiqi ah bal intaas aynu kudaayno tusaalayaalka lagu garankaro shirkiga weyn. Balse 10ka nawaaqidu islaam loo yaqaan  hal mar aan si**

**guud ahaan udulmarno ayagoo daliil koodana wada** **قال الشيخ محمد بن عبدالوهاب رحمه الله تعالى: اعلم أن من أعظم نواقض الإسلام عشرة:**

**الأول: الشرك في عبادة الله وحده لا شريك له، والدليل قوله تعالى: ( إِنَّ اللَّهَ لاَ يَغْفِرُ أَنْ يُشْرَكَ بِهِ وَيَغْفِرُ مَا دُونَ ذَلِكَ لِمَنْ يَشَاءُ ) [النِّسَاء: 48]. ومنه الذبح لغير الله، كمن يذبح للجن، أو القباب.**

**الثاني: من جعل بينه وبين الله وسائط، يدعوهم ويسألهم الشفاعة كفر إجماعاً.**
**الثالث: من لم يكفر المشركين، أو شك في كفرهم، أو صحح مذهبهم، كفر إجماعاً.**

**الرابع: من اعتقد أن غير هدي النبي صلى الله عليه وسلم أكمل من هديه، أو أن حكم غيره أحسن من حكمه، كالذين يفضلون حكم الطاغوت على حكمه، فهو كافر.**

**الخامس: من أبغض شيئاً مما جاء به الرسول صلى الله عليه وسلم، ولو عمل به، كفر إجماعاً، والدليل قوله تعالى: ( ذَلِكَ بِأَنَّهُمْ كَرِهُوا مَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأَحْبَطَ أَعْمَالَهُمْ )[محَمَّد: 9].**

**السادس: من استهزأ بشيء من دين الله، أو ثوابه أو عقابه كفر، والدليل قوله تعالى: ( وَلَئِنْ سَأَلْتَهُمْ لَيَقُولُنَّ إِنَّمَا كُنَّا نَخُوضُ وَنَلْعَبُ**

قُلْ أَبِاللَّهِ وَآيَاتِهِ وَرَسُولِهِ كُنْتُمْ تَسْتَهْزِئُونَ * لاَ تَعْتَذِرُوا قَدْ كَفَرْتُمْ بَعْدَ إِيمَانِكُمْ إِنْ نَعْفُ عَنْ طَائِفَةٍ مِنْكُمْ نُعَذِّبْ طَائِفَةً بِأَنَّهُمْ كَانُوا مُجْرِمِينَ ) [التّوبَة: 65-66].

السابع: السحر، ومنه الصَّرْف والعَطْف، فمن فعله أو رضي به كفر، والدليل قوله تعالى: ( وَمَا يُعَلِّمَانِ مِنْ أَحَدٍ حَتَّى يَقُولاَ إِنَّمَا نَحْنُ فِتْنَةٌ فَلاَ تَكْفُرْ ) [البَقَرَة، من الآية: 102].

الثامن: مظاهرة المشركين ومعاونتهم على المسلمين، والدليل قوله تعالى: ( وَمَنْ يَتَوَلَّهُمْ مِنْكُمْ فَإِنَّهُ مِنْهُمْ إِنَّ اللَّهَ لاَ يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ ) [المَائدة، من الآية: 51].

التاسع: من اعتقد أن بعض الناس لا يجب عليه اتباعه صلى الله عليه وسلم، وأنه يسعه الخروج من شريعته، كما وسع الخضر الخروج من شريعة موسى عليهما السلام، فهو كافر.

العاشر: الإعراض عن دين الله، لا يتعلمه ولا يعمل به، والدليل قوله تعالى: ( وَمَنْ أَظْلَمُ مِمَنْ ذُكِّرَ بِآيَاتِ رَبِّهِ ثُمَّ أَعْرَضَ عَنْهَا إِنَّا مِنَ الْمُجْرِمِينَ مُنْتَقِمُونَ * )[السَّجدَة].

## Isxasuusin

**1: waa maxay shirki akbar 2:sheeg farqiga udhaxeeyo shirki akbar iyo shirki asqar 3:qofkii shirki akbar kudhaco dilkiisa yaa**

**kushuqul leh 4: keen laba tusaale oo shirki akbar ah**

**Iftiimin**

**1: shirki akbar waa gaalnimo weyn oo kaduwan shirki asqarka**

**2: farqi 4 farqi ayaa udhaxeyso shirki akbar iyo shirki asqarka oo kala ah A:diinta loogama baxo, shirki asqarka laakiin shirki akbarka diinta ayaa looga baxaa. B:camalkaaga soo socdo iyo kii horeba kaama burinayo shirki asqarka laakiin camalkaagii hore wuu kaaburinayaa shirki akbarka, sidokale waxa uu burinayaa camalka soosocdo hadii aan lasameynin towbad keen sababtoo ah wali qofkaasi waa gaal,gaalne waxbo lagama aqbalo, c:shirki asqarka dhiigaaga iyo maalkaaga xalaal kuma noqonayaan,laakiin shirki akbarka ruuxii kudhacaa dhiigiisa waa xaalal maalkiisa sidokale. D: shirki aqarka towbo sharti uma ahan laakiin shirki akbarka si aad ugasoo laabato waa inaad towbad keento**

**3:madaxweynaha ama hogaanka**

**4:kujees jeeska diinta iyo caabudida alle wax aheyn.**

## Sidee salaada loogu khashuucaa

**Maadama aan soo ogaanay  khashuuca iyo qeexidaankiisa,sidokale aan soo ogaanay waxyaabaha kugaarsiinkara,sidookale aan soo ogaanay waxyaabaha kaa fogeyn kara hada iyo waxii kadambeeyo waxaan kahadli doonaa su'aasha aan buugga kumagacaabay ee ah SIDEE SALAADA LOOGU KHASHUUCAA.  Sheygii hadii aad taqaano waxa uu yahay,sida loo helikaro,sida aad kuwaayikarto, geliya waxaa kuudhiman hadaa heshid sida aad uga faaideysalaheyd? Hada waxaan halkudhig kadhiganeynaa sidee marka ukhaahuuceynaa salaada dhexdeeda,ama sidee salaada loogu khashuucaa?**

**Ugu horeyn aan dib ugu noqono oo aan soo ogaano dadkii hore ee khashuuci jiray sida ay ahaayeen, iyo qaabka ay u khashuuci jireen,  waxaan tusaale kadhiganeynaa ka ugu wanaagsan ee  tusaale laga dhigto.**

**Oo aha NABI MUXAMED scw bal suu ahaa marka uu salaada ku khashuucayo?**

**Waxaa qaluubtiisa kayeeri jirtay marka uu salaada kujiro sida dhawaqa dharey(digsi) lakarinayo oo kale.**

**Sidoo kale saxaabada aan soo qaadana kii ugu kheyrka badnaa ee abuu bakar sadiiq waxaa lasheegaa in uu salaada marka uu kujiro uusan waxbo ka ogeyn waxa agtiisa kadhacayo iyo inuusan miliclicsi yar uusan kusameyjirin.**
**Sidookale waxaan tusaale usoo qaadaneynaa kuwii umada ugu kherka badnaa nabiga iyo saxaabada kadib oo ah Taabiciyiintii, ayagana waxaan kasoo qaadaneynaa nin kamid ahaa taabiciyiintaas oo ladhaho XAATIM,waxaa laweydiiyay SIDEE SALAADA UGU KHASHUUCDAA? Xaatim al asami waxa uu kujawaabay, marka aan aadaan maqlo waxaan aadaa masjidka waxaan qalbiga usheegaa in alle hor istaagayo,kadibna waxaa sawirtaa (niyada kashtaa) in meesha aan kudaaganahayo ee labadeyda lugood hoostooda ah in uu jidkii siraadka yahay, midigteydana jannadii iga daalo,bidixna ay naar iiga daalo,horteydana**

**kacbadii sharafta laheyd aytahay,gadaalna malakul mowt oo iga xigo,salaad midaan kadambeysana duka doonin markaas baan si khashuuc leh salaada ugalaa,**
**Marka ruuxkasto inuu sawirto xaaladaan waa muhiim. Hadii aad rabto khashuuc fiican salaada kahor sidaas sawiro.**
**Qaabka kale ee salaada ugu khashuuci kartaa waa inaad alle ucaabudo sida asagoo ku arkaya  oo kale.  Maxaa yeelay rasuulka scw markii jabriil weydiiyay waa maxay ixsaan? Rasuulka scw wuxuu dhahay waa inaad alle ucaabudo sida adigoo arkaya, hadii adiga arkeynin asaga ayaa ku arkaya.**
**Marka si aad ukhashuucdo waa inaad qalbigaaga kusoo xaadarisaa ama niyada kashadaa in alle uu ku arkayo, oo uu kuujeedo, adigane aad mudantahay inaad ka xishoodo rabigaa oo salaada uu kugu waajibka yeelay aadan kufalaadin.**

## Qeybaha khashuuca

**Horta sheykastaa oo muhiim ah qeybo ayuu leeyahay, ha nqdo diini ama maadi, sheykasta inuu muhiim yahay calaamada**

**lagu aqoonsadaa waa inuu qeybo kabaxaa lee yeehay. Tusaale ugu horeyn waxa aad heysato iimaanka kasugo ee ugu qaalisan waa nafta kugu jirto,nafta waxey leedahay qeybo ay uqeybsanto sida uu sheegay imamkii ama sheekhii weynaa ee ibnu qayim alle ha siiyo naxariis waa sac ah, ee waxuu yir waa 3 qeyb nafaha. . i قال ابن القيم رحمه الله في كتاب "الروح": هل النفس واحدة أم ثلاث؟ فقد وقع في كلام كثير من الناس أن لابن آدم ثلاث أنفس: نفس مطمئنة، ونفس لوامة، ونفس أمارة،**

**MACNAHA hadalka muhiimadiisa aan abaaro ee waa in dadka naftoodu 3 nooc mid aytahay,oo kala ah:1:nafsu mudma'ina 2:nafsu lawaamah 3:nafsu amaaratu bisuu'i**

**SHARAXAAD**

**1: nafsu mudma'ina waa nafta toosan oo alle kabaqda oo dembiyada iska ilaalisa, oo ugu fiican 3dan, waana mida suuratu fajri lagu sheegay. 2:nafsu amaaratu bisuu'i waa naf aad uxun,oo hawada raacday oo sheydhaanka u hogaansantay,**

**3:nafsu lawaamah:waxey udhaxeysaa mudma'ina iyo amaaratu bisuu'i,oo sidii midii hore aad uma wanaagsana**

**dembiyadana sidii tii hore iskama ilaaliso, laakiin midii dambe(amaaratu bisuu'i) ayay dhaantaa oo hawada saa'id uma raacin, weyna kasoo noqotaa qaladaadka,waana naf dhexdhexaad iska ah, oo xumaanta kumeysan talaxdegin sidookale wanaaggana sidii mudma'inada oo kale maysan gaarin.**

**Sidokale maadiga muhiimka wuu qeybsamaa sida biology oo uqeyb samo botany,zoology, microbiology**
**Sidokale chemistry waa muhiim asagana wuxuu leeyahay laamo oo kala ah organic chemistry,in organic chemistry, biochemistry, analytical chemistry**
**Sidokale physicska asagana 2 ayuu uqeyb samaa oo kala ah classical physics, modern physics. Intaas waa kuwa ugu muhiimsan qaasadan maadooyinka scientific ladhaho waa kuwa ugu sii muhiimsan,**

**marka sheykastaa oo muhiima wuu qeyb samaa ha ahaado maadi ama diini,**
**Sidookale aan soo qaadano diiniga, asagana wuu qeybsamaa,  aan kuhormarno arkaanu**

**qamsaha ama arkaanu islaamka 5ta ah, aan soo qaadano rukniga ama diirka ugu dambeeyo ee 5aad,soo xajka maaha, xajka 2 ayuu uqeybsamaa waana xaj waajib ah iyo midna sunno ah(cumro).**
**Sidookale waxaa kusoo xiga soonka ama ramadaanka asagana 3 ayuu uqeyb samaa oo kala ah soon waajib ah,soon sunno ah, soon nadar ah(soon uu alle kugu waajibin balse adiga iskuwaajebisay,sida inaa tiraahdo hadaan imtixaanka baaso 3maalin ayaan soomayaa, markaa inaad 3maalin soontaahi waa waajib adiga iskuwaajebisay, laakiin alle qasab kuuguma waajibin, ee adiga ayaa doonistaada isugu waajib yeelay)runtii majiro soon lasoomo oo 3daan kabaxsan ilaa wuxuu ukala noqonayaa 3daan qeybood oo ah inuu sunno noqdo, ama waajib noqdo,ama nadar uu noqdo,**
**Diirka kusoo xigaa soonka waa salaada ayadana wey qeybsameysaa,oo waxey u qeyb sameysaa 2 oo kala salaad sunno ah, ama salaad waajib ah, salaada qodobka kuxigaa marka hoos laga soo bilaabo waa towxiidka, towxiidka asagana maadaama uu**

**muhiim yahay, soona sheegnay in calaamada lagu aqoonsadaa sheykastaa oo muhiima asagana  uu yahay muhiim waa qeybsamaa, waxa uuna leeyahay qeybo,waxuuna uqeyb samaa 3 qeybood oo kala ah 1: towxiidu uluuhiya(waa in cibaadada alle loo gaar yeelo geligiisna uu leeyahay hadaan soo dhaweyno qeexidaanka,waa in aad rumeysaa in cibaadada adiga kaa imaaneyso sida salaada,soomka, xajka, alle geligiis lee yahay) 2: towxiidu rabuubiya( waa inaad rumeyso waxa alle uu sameynayo sida abaarta, roobka,IWM UU alle geligiis samenayo,oo aysan jirin cid lafaragashato) kii hore ee uluuhiyada  ahaa waxuu ahaa in aad adiga waxa aad sameyneyso alle ugooni yeesho, oo ah cibaadada aad sameyneysid sida,salaada, soonka,xajka,baryada,cabsida , magankalka , IWm.  laakiin midkaan dambe ee rubuubiyada waa inaad alle ugooniyeesho waxa uu asaga sameynayo, sida roobka, abaarta, sharta,kheyrka iyo dhamaan qadarka oo idil.**

**3: asmaa'u waa sifaatka(waa inaad alle usugto sifaatka uu iskudilmaamay,sida inuu wax maqlo oo samiic yahay, inuu wax arko oo basiir yahay,inuu carshiga kasareeyo lwm)**
**Dhamaan qodobada maadiga iyo diiniga ah ee aan soo taxnay waxey tusaale uyihiin, iney qeybsamaan waxkasta oo muhiim ah, dankalena kama laheyn ee waxey aheyd in aynu usii gogol xaarano qodobka aan buuggan ugahadleyno oo ah khashuuca inuu asagana qeybsamo oo uu qeybo leeyahay, horta darajooyinka khashuuca rasuulka scw ayaa sheegay ee aynu kawada faaideysano.**
**Horta Rasuulka salalaahu calayhi wasalam waxuu  ahaa mid waxkasta oo kheyra inoo sheega oo aan waxba naga qarin,sidookale sharkastaa wuu  inooga digay,**
**Sidaa dardeed ayuu rasuulka scw yiri qofbaa dukanaya oo salaadaas leh cushurahaa( 10 meelood meel ) ama 10%,sidookal midaa leh tusucuhaa malaha waa waxkayar 13%, midkalebaa leh, thumunkeed ayadana waa ⅛**

Sidii uu usoowaday nabiga waxuu dhahay midbaa leh niskeed(kalabarkeed)50%
Marka su'aashu waxey tahay maxey dadkaan hal meel iskuladukaday ukala ajar badeen? Horta alle dad madulmiyo subxaana allaah qofkastana waxuu shaqeystay wuu siiya. Marka waxaan ka ogaaneynaa halkaas in waxa ay kugaladageen dadka ay ahaayeen khashuuca. Halkaasna waxaan kafahmeynaa in khashuuca qeybo ama darajooyin uu leeyahay. Waxeyna kala yihiin 1:khashuuca wata dawaaduc iyo isduleyn. 2: khashuuc wata xasilooni degenaan iyo aamusid.:أحدهما التواضع والذل . والثاني : السكون والطمأنينة. وذلك مستلزم للين القلب المنافي للقسوة.

Labadaan khashuuc farqi ayaa udhaxeeyo oo kala ah midka hore waxaa la imaankara ruux fahmaya waxa la aqrinaayo, ama waxa uu aqrinaayo. Macnaha waa qof tafsiirka ubilaabanyahay, khuucan astaantiisu waa inuu qofka dawaatuc iyo isduleyn la imaado kibirna illaabo. Sababtoo ah qof maqlaya aayada alle ee ah كلا انا خلقناهم مما يعلمون. Macquul uma aha inuu sii kibro,maxaa

**yeelay waxuu maqlayaa waxa laga abuuray ee liido oo ah mani(shahwo)**
**Midka 2aad waxaa la imaankara qofka aan tafsiirka aqoonin ama macnaha aayaadka garaneynin. Geliya waxa khashuucaas u astaanta ah ayaa ah xasilooni iyo aamusid. Oo lagawado  inuu qofka ku aamuso 6 meel aan soo sheegnay, sidookalena uu xasilooni layimaado.**

**Is xasuusin**

**1: sheeg khashuuca rasuulka siduu ahaa.**
**2:sheeg khashuuca abuu bakar siduu ahaa**
**3:sheeg khashuuca xaatim siduu ahaa.**
**4: sheeg qeybaha towxiidka**
**5: sheeg waxa ay kugala duwanyihiin towxiidu rabuubiya iyo uluuhiya.**
**6:maxaa calaamad ama astaan u ah waxkasta oo muhiima.**
**7: sheeg qeybaha khashuuca**

**Iftiimin**

**1:waxuu ahaa mid qalbigiisa uu la shanqaro**
**2: mid aan meelna umilicsan**
**3:mid sawirta suurad cajiib ah**

**4:towxiidu uluuhiya, rabuubiya, asmaa'u wasifaat**
**5: uluuhiya(waa inaad alle u khaalis yeeahid waxa aad suubineyso sida cibaadada)**
**Rabuubiya( waa inaad alle ukhaalis yeesho waxa uu suubinayo sida qatarka)**
**6:waxaa astaan u ah qeybsanaan**
**7:waa labo nooc**

## Muhiimadda khashuuca salaada

**Khashuucayo salaada hadii aad hesho waxa aad heshay macaanka salaada, maxaa yeelay khashuuca waa umuhiim salaada, Nin aan umaleynayo inuu saxaabi ahaa oo aan hada xasuusanin magaciisa baa hadii kahor lugahiisa lug kamida laga qabtay, markaa lugtii waxey noqotay in laga jaro, dadkii kore maheysanin mashiino casri ah,mana heysanin, isbitaaladaan oo kale, markii asaga laweydiiyay oo ladhahay lugta waa lagaa jarayaa, yara waana xanuun ee kawaran, waxuu dhahay salaada anigoo kujira hala iiigajaro, maxaa yeelay markaas waxdhan madareemayo, markii uu salaada galay,ayaa laga jaray lugtii asagoo xanuun dareemin, geliya asagoo iskuduleynayo alle**

**iyo hor isdaagiisa,maxaa yeelay rasuulka waxuu dhahay qofkii salaada kujiraa alle ayuu lamunaa joonayaa(hortaagan yahay) Sidookale muhiimada uu khashuucu leeyahay waxaa kamida kuxernaashiyaha alle,maxaa yeelay markasta oo khashuucaaaga bado waa markasta oo alle kuxernaashiyahaaga bado, iyo inaad masjidka kuxernaado. Rasuulka scw markii uu tirinayay 7da qof ee carshu raxmaanka harsaneyso waxaa kamid ahaa ruux qalbigiisa lagu xeray masjidka,**
**Marka markasto uu bado khashuucaaga waa markasta oo cibaadadii aad sii jeclaado allena kusii dhawaado.**

**Qodobka kale ee khashuuca salaada laga helayaa waa in qalbigaaga uu diido xumaan inuu damco, sababtoo ah keyr iyo shar meel islama galaan,marka xumaantii waa aad kahareysaa,rasuulkana waa inoo sheegay quraankana waa lagu sheegay sida aan horay usoo xusnay salaada waxay kuu diideysaa oo ay difaac kaaga tahay dembiyada,salaadaasna waa salaada lagu**

**khashuucay,ee maaha mid ladukaday iyadoo aan la xasuusanin faataxada kadib suuradii la aqriyay.**
**Sidookale waxaad kaheleysaa khashuuca in aad salaada aad ku raaxeysato, sababtoo ah rasuulka scw waa khashuuci jiray khashuucaasna waxuu kasii siyaadsan jiray raaxo uu kuraaxeysto salaada, waxaana kutusaya marka ay salaada soo gasho waxuu dhuhijiray ارحنا بها يا بلال oo macnaheedu yahay bilaalow salaada noogu raaxey. Sidookale indha doogsia rasuulka salaad ayay aheyd, oo rasuulka waxuu dhahay 3 ayaa la ii jecleysiiyay oo kala**
**1:waxyaabaha carfaya(barfuun IWm.)**
**2:dumarkana waa la ii jecleysiiyay**
**3:salaadana waa la ii jecleysiiyay oo waxaa laga yeelay indho qabowsigeyga**

**Khashuuca faaidooyinkiisa masoo goobikarno,sidoo kale khashuuca salaada waa muhiim, sidaa dardeed ayuu ibnu qayim ukala qaaday salaadaha ay dadka dukadaan ilaa 5 qeyb oo kala ah**

**1:kuwo salaada wey dukanayaan mana ku ilaalinayaan waqtigooda, jameecadana kuma ilaalinayaan.  Marna weydukanayaan marna wey kadagaan. Qolodaan alle salaadooda wuu kucadaaba maalinta qiyaame.**
**2:qolokalena wey dukanayaan,waatigeedana wey ilaaliyaan,jameecadana wey xaadiraan, laakiin qalbigooda xaadir ma ahan ee wey iska maqanyihiin. kuwaa salaadooda waxey hortaalaa doonista  alle haduu doono wuu ku cadaabi,haduu doonana wuu ugu naxariisanayaa**
**3:qolona wey dukanayaan, waqtigeedana wey ilaalinayaan, jameecadana wey ku dhowrayaan, laakiin sheydhaanka ayaa badanaa soo weeraro, salaada iyo khashuuceeda kahor isdaaga, asagana wuu iskanaaraa,oo wuu ladagaalamaa, sidaa ayuu sheydhaanka dagaal joogto ah kulajiraa,kuwaas alle salaadooda intii uu sheydhaanka kaxumeeyay asagaa ayaa kacafinaya maadama uusan isdhiganin, intii layimdna waa laga ajarsiinayaa**
**4:qolokalana waa qolo ay salaadu caado unoqotay,hadii baadi kalunto salaad ayay**

**aadayaan, hadii baahi qabato rabigood ayay duugayaan oo salaad bey kalayaan,**
**5: salaada 5aadna waa salaadii nabiga oo ah salaad raaxo iyo khashuuc wadada,**

**DHAMAAD**
**nabiga kusali salallaahu calayhi wasalam.**
**Siina faafi buuggan ugu yaraan hal qof sii gaarsii,waxaa laga yaabaa inuu anfaco aniga iyo adigane ajar kahelno.**